



PORLAND PUBLIC SCHOOLS

REOPEN

Xogtii ugu Dembeysay ee Cuntada PPS: Sida Loo Helay Cuntada Laga Bilaabo Todobaadka Soo Socda

Maarso 25, 2021

Qoysaska Qaaliga ee PPS,

Helitaanka cuntadu waxa ay lagama maarmaan u tahay qoysas farab iyada oo aan ka shaqeyneyno sidii aan hubin lahayn inay sii socot inay dhammaan ardaydu helaan cuntada, haddii ay ku soo noqonayaan iskuulada iyo haddii ay guryaha waxbarashadoodii ku sii qaadanayaan. Dhammaan cuntadii iskuulada laga bixin jiray waxay noqon doontaa mid bilaa lacag u ah dhammaan ardayda oo dhan, lama weydiin doono ID(aqoonsi) ardayda marka ay cuntada qaadanayaan ama magacyadooda si ay u helaan cuntada.

Marka ardaydu ay ku soo noqdaan waxbarashada fasalada lagu qaadanayo ee iskuulka, cuntada waxa laga siin doonaa iskuuladooda marka fasalada waxbarashadu dhammaanto maalintaasi.

Haddii ardaygu go'aansado inuu waxbarashadiisa ku qaato gurigooda—ama haddii waxbarashada iskuulada lagu qaadanayaan aysan wali bilaabmi—waa in ay booqdaan mid ka mid ah **goobahayaga cusub ee cuntada laga qeybinayo** saacdaha u dhaxeeya 3:30 iyo 4:30 p.m. maalmaha iskuulku furan yahay in lag aqaado cuntada. Liistada goobaha cuntada laga qeybiyo waa kuwan xagga hoose ku yaal.

Sidaas darteed, ardayda waxbarashada ku qaadanaya guryahooda sidoo kale waxa ay haystaan ikhtiyaar ay cuntada kaga soo qaataan iskuuladooda. Qoysasku waa in ay la xiriiraan iskuulada ardaydooda sidii ay u heli lahaayeen jadwalka waqtiyada cuntada la qeybiyo.

Goobaha Cusub ee Cuntada Laga Qeybinayo

Xusuusinta sanadka, cuntada-qaado-oo-dhaqaaq waxaa la heli karaa saacada 3:30 ilaa 4:30 galabnimmo maalmaha iskuuladu ay furan yihiin iyada oo cuntada la siinayo dhammaan caruurta bulshada(ardayda PPS iyo caruurta aan wax ka baran PPS labadaba) ee da'doodu u dhaxayso 1 sano ilaa 18 sanno.

Goobaha laga cuntada ee bannaanka iskuulada lagu qeybinayaan waa:

- Dugsiga Dhexe ee Beaumont, 4043 NE Fremont St.
- Dugsiga Sarre ee Franklin, 5405 SE Woodward St.
- Dugsiga Dhexe ee George, 10000 N Burr Ave.
- Dugsiga Dhexe ee Harriet Tubman, 2231 N Flint Ave.
- Dugsiga Dhexe ee Hosford, 2303 SE 28th Pl.
- Dugsiga Sarre ee Ida B. Wells, 1151 SW Vermont St.
- Dugsiga Dhexe ee Jackson, 10625 SW 35th Ave.

- Dugsiga Sarre ee Jefferson, 5210 N Kerby Ave.
- Dugsiga Dhexe ee Lane, 7200 SE 60th Ave.
- Leodis V. McDaniel @ Dugsiga Sarre ee Marshall, 3905 SE 91st Ave.
- Dugsiga Dhexe ee Mt. Tabor, 5800 SE Ash St.
- Dugsiga Dhexe ee Ockley Green, 6031 N Montana Ave.
- Dugsiga Dhexe ee Robert Gray, 5505 SW 23rd Ave.
- Dugsiga Sarre ee Roosevelt, 6941 N Central St.
- Dugsiga Dhexe ee Roseway Heights, 7334 NE Siskiyou St.

Wixii wara dheeraad ah ama haddii aad hayso su'aalo, waxaad fadlan booqataa [Shabakada Addeega Cuntada PPS](#). Waxaad sidoo kale email u soo diri kartaa halkan nutritionservices@pps.net ama waxaad soo wici kartaa telefoonkani 503-916-3399.

Mahadsanidin.